## WAA MAXAY BAARITAANKA DADKA LALA MACAAMULAY?

Dadka ku hareereysan bukaanka qaba caabuqa waa la baaraa si loo eego inay sidoo kale qabaan caabuqa mise la il daranyihiin.
Kani waa iyadoo la maraayo baaritaanka maqaarka ee qaaxada, IGRA (baaritaan dhiig) iyo/mise raajada sambabka.

Dadka ku hareereysan qof buka ayaa sidoo kale la baaraa, si loo ogaado halka uu cudurka ka yimid.



## MA DOONAYSAA INAAD WAX BADAN OGAATO?

Dhakhtarkaaga la tasho.

Booqo **www.departementzorg.be** mise la xiriir Waaxda Daryeelka gobolkaaga:

- Antwerp: 02 553 08 92
- Limburg: 02 553 08 93
- East Flanders: 02 553 08 94
- Flemish Brabant: 02 553 08 93
- West Flanders: 02 553 08 94

Booqo **www.vrgt.be** mise la xiriir Ururka Flemish ee Daryeelka Caafimaadka Habdhiska Neefta iyo Maareynta Qaaxada (VRGT) ee gobolkaaga:

- Antwerp
  Berchem: 03 287 80 10 - Turnhout: 014 41 13 62
- Brussels: 02 411 94 76
- Limburg: 011 22 10 33 (Hasselt)
- East Flanders: 09 225 22 58 (Ghent)
- Flemish Brabant: 016 79 09 92 (Leuven)
- West Flanders
  Ostend: 059 79 02 58 - Kortrijk: 059 79 02 57

Waxaa daabacay: Karine Moykens, Secretary General, Waaxda Daryeelka, Boulevard Simon Bolivar 17, 1000 Brussels | Sibteembar 2024

VRGT VLAAMSE VERENIGING VOOR RESPIRATOIRE GEZONDHEIDSZORG EN TUBERCULOSEBESTRIJDING VZW

Waaxda Daryeelka
infectieziektebestrijding@vlaanderen.be
**www.departementzorg.be**

Vlaanderen
is zorgzaam en
gezond samenleven




# BAARITAANKA MAQAARKA WAXAA LAGA ARKAY CUDURKA

si loo ogaado qaaxo

DEPARTEMENT
ZORG

**departementzorg.be**

**Baaritaanka qaaxada maqaarka (baaritaanka Mantoux mise baaritaanka maqaarka hoose) ayaa muujinaya haddii aad qabto bakteeriyada qaaxada. Bakteeriyada sababta qaaxada.**

**Nooca ugu badan ee cudurka waa qaaxada sambabada. Kalyaha, lafaha, maskaxda, qanjidhada muse xubnaha kale ayaa sidoo kale mararka qaar qaaxadu saameysaa.**

## SIDEE LOO QAADAA BAARITAANKA?

Wax yar oo dareere ah (tuberculin) ayaa lagu duraa maqaarka gacanta. Jawaabta waxaa la hubiyaa dhawr maalmood kadib baaritaanka.

Baaritaanka qaaxada ee maqaarka maahan mid khatar ah waxaana sidoo kale lagu sameyn karaa carruurta yaryar mise haweenka uurka leh.



## JAWAABTA WAA MA QABTID CUDURKA.

Haddi wax falcelin cad aan laga arkin gacanta marka baaritaanku socdo, markaas waxay u badantahay inaadan qaadin bakteeriyada qaaxada.

Mararka qaar waxaa lagama maarmaan ah in la sameeyo baaritaanka laba bilood kadib.

## JAWAABTA MA CADDA

Haddii barar yar laga dareemi karo gacanta inta lagu jiro baaritaanka, ma cadda in aad cudurka qabto iyo in kale.

Haddii natiijadu aysan caddayn, baaritaan cusub ayaa mar walba la qaadaa (badanaa laba bilood kadib).

## JAWAABTA WAA WAAD QABTAA.

Haddii barar cad iyo adeeg maqaarka ah laga dareemi karo maqaarka inta lagu jiro baaritaanka, waad qabtaa cudurka.

Haddii baaritaanka maqaarkaaga qaaxada uu sheego inaad qabto, Raajada sambabbada ayaa lagaa qaadi doonaa si loo eego haddii aad qaaday qaaxo. Haddii Raajada sambabada ay caadi tahay, markaa waad qaaday cudurka balse maadan bukoon oo dadka kale ma qaadsiin karitd.

Haddii lagaa helo, daawo ayaa lagugula talinayaa inay kahortagto inaad bukooto. Kala hadal tan dhakhtarkaaga guud.

Haddii astaamaha qaaxada ay ka muuqdaan raajada sambabada, waxaad u baahantahay inaad bilowdo dawaynta. Kadib waa in aad qaadataa daawooyin kala duwan wakhtiyo go'an ugu yaraan lix bilood.

## Baaritaanka tiibishada maqaarka waa laga helay

| Raajada sambab caadi ah | Raajada sambab aan caadi ahayn |
|---|---|
| Qaaday cudurka balse ma buko | Qaaday cudurka misena buka |
| **daweynta kahortagga** | **Daweyn** |
| 1 mise 2 dawo oo la qaadanayo 3 ilaa 6 bilood | daawooyin kala duwan ugu yaraan lix bilood |